



## Ardayda Alliance ee ku yaala Meek oo isku daray sayniska iyo xirfadaha warbaahinta si ay u soo saaraan buug

Su'aasha salka u ah buuga oo ay dejieen isla markaana daabaceen ardayda Dugsiga Sare ee Alliance ee ku yaala Meek waa mid sahan: "Ma cuni karaa?" Buuga, "Field Guide to the Fungi of Opal Creek," wuxuu ahaa dadaal wada shaqayneed oo ka dhixeyya garabyada sayniska iyo warbaahinta ee dugsiga.

Buugu wuxuu muujinayaa isla markaana sharaxayaa 34 noocyada mushroom oo laga helo Goobaha Muuqaalka Madadaalada iyo Duurjooga ee Opal Creek, oo ku yaala Willamette National Forest. Waxay isku dartaa aqoonta iyo xirfadaha ay ardaydu ka hoos barteen Joe Ferguson, oo dadka bara Khayraadka Dabiiciga ah, iyo Amy Taramasso, oo dadka barta Warbaahinta Dhijitalka.

Mushroom kasta waxaa lagu muujiyaa sawirro muuqda, oo ay qaadeen ardayda Alliance, iyada oo lagu sharxo qoraalka ay qoraan ardayda, oo si buuxda cilmi-baarlis ugu sameeyay fungi kasta. Qoraal kasta korkiisa waxaa taagan su'aal weyn: miyaa la cuni karaa mushroom? Jawaabuhu way kala duwan yihiin. Tusaale:

**Nooca Dusha Siman Ee Adag Leh 'Flat-Top Club Coral':** "Haa, wuxuu leeyahay dhadhan macaan waxaana loo isticmaali karaa macaan ahaan ama cunto macmacaan ah."

**Morel-ka Beenta ah 'False Morel':** "Maya! Waa sun wax dhisha – xaqiiqdii, waxaa ku jira gyromitrin, oo ah waxyabo aan deganay oo kiimikal ahaan u sii kala jajaba oo noqda foormulada kiimikada 'monomethylhydrazin', oo ah waxyabaha loo isticmaalo shidaalka dayac-gamceedka."

"Runtii waanu ka warqabnay xaqiiqda ah in mushrooms runtii yihiin kuwo xiise iyo halis leh labadoodaba," ayay sheegtay Taramasso. "Waxaanu aad uga taxadarnay shaqadayada."

Ferguson wuxuu ardaydiisa u qaaday Opal Creek muddo sanado ah, wuxuuna la sheekaystay Megan Selvig, oo ah agaasimaha Opal Creek, wuxuuna ogaaday in uu jiray buug wax tilmaamaya oo si xirfad leh loo soo saaray oo ku saabsan berri-biyoodka 'amphibians' ka jira degaanka, laakiinse aan ku saabsanayn fungi. Iyada oo la joogo tababarka xagaaga ee ka jira Meek, wuxuu la soo qaaday Taramasso fikrad taasi oo ku saabsan in deeqda lacageed ee dugsigu helo loo adeegsado mashruuca ku saleysan waxbarasho si loo soo saaro buug.

"Joe ayaa yiri, 'Waxaan keeni karaa dad khibrad u leh sayniska haddii aad keeni karto daabacaad iyo qaabka uu yeelanayo iyo sawirro iyo muuqaalka warbaahinta,' ayay sheegtay Taramasso. "Waxaan u sheegay in ay u eg tahay mid cabsi iyo xiiso leh oo run ahaantiina wax la hiigsanayo, balse waan ka qayb qaadanayaa."

Qorsheynta ayaa dhacday intii lagu jiray xagaaga, iyada oo ka dib markii ay ardaydu heleen tababarka, ay kooxdu tegtay Opal Creek si ay u helaan fungi. Shaqaalaha halkaasi jooga ayaa ka caawiyay in ay aqoonsadaan si ay sawir uga qaadaan isla markaana ay dib ugu noqdaan fasalka si loo baaro isla markaana loo aqoonsado.

Mid ka mid ah caqabadaha ayaa ahayd in Oktoobartaasi ay ka qalayl ‘drier’ badnayd bilaha kale ee caadiga ah, iyada oo kayntuna aysan qoyaan ku filan lahayn si uu dhammaan fungus si ku filan u koro si ardaydu sawir uga qaadaan. Taasi waxay ku qasabtay in ay aadaan meelo ka baxsan si ay u helaan sawirro, oo loogu talagalay fursado waxbarasho.

“Taasi waxay runtii ahayd waayo-aragnimo wanaagsan oo loogu talagalay carruurta sababta oo ah waxaan baray waxyaabo ku saabsan isticmaalka cadaaladda iyo xuquuqda lahaansho ‘copyright,’” ayay sheegtay Taramasso. “Waxay ahayd fursadii ugu wanaagsanayd ee aan weligay helo in aad ardayda wax ka baro xuquuqda lahaansho ‘copyright’. Waxay muhiim u tahay warbaahinta dhijitalka, in la hubiyo in aad waxyaabaha u isticmaalaysaan si sax ah.”

Mashruucani wuxuu noqday mid muhiim u ah ardayda taasi oo, Ace Swanson, oo isla horeba u haystay credit ku filan oo uu ku qalin jabiyo, uu dib u soo laabtay dayrtii si uu gacan uga geysa qaab u yeelida iyo dhammeystirka boggaga.

Dugsigu wuxuu bilawgii hore soo daabacay 250 bog taasi oo ahayd daabacaadiisii koowaad, iyada oo Taramasso sheegtay in iyada iyo Ferguson ay rajeynayaan in ay abuuraan daabacaado dhanka mustaqbalka oo wata qoraalo badan, iyo suurtgalnimada in ay isla wada suuqgeeyaan Opal Creek si loogu gadi karo Xaruntiisa Kaynta ‘Forest Center’.

Ardayda ka soo shaqeysay buugu waxay kala ahaayeen Natalie Mindra, James Ericson, Suley Vazquez, Viridiana Garcia-Gonzalez, Arturo Garcia-Olvera, Bear Slates, Kayla Ford, Jeremy Bowen, Zach Kelly, Torense Weldon, Aurora Rose, Will Morrison iyo Ceanna Beavers. Ardayga kulliyadda dhigta, ee Seng Saechao, ayaa ka caawiyay sawirrada.